



# Wararkii u Dambeeyey ee Sharaxaada Ku Aadan Darawal Yaraanta Basaska Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS)

Waaliidiinta Qaaliga ah ee PPS,

Sida in badan oo idinka mid ahi aad ka warqabtaan, waxaan waajaheynta haddii aynu nahay Dugsiyada Dadweynaha Portland wadayaasha leh shatiyada(Laysanada) lagu kaxeyyo basaska oo yar. Sidaas awgeed, waxa aanu joojinay qaar ka mid ah jidadkii basaska iskuuladu mari jireen, iyo in kuwa kale waqtiyadii ardayda laga soo qaadi jiray ama lagu dejin jirey iyaga waqtiyadii wax laga bedelay.

Ugu horeyn, waxaan rabnaa inaan aqoonsano darawaladani yaraaday inay saameyn ku yeeshen awoodii ay bulshadeenu ay ku iman lahayd ayna ka soo noqon lahaayeen dugsiga. Wuxaan idiinka mahadcelineynaa dulqaadkiina inta aan ku jirno sidii aynu xaalandan uga bixin lahayn.

Mar labaad, waxaan rabnaa inaan idin xaqijino inaad ka warqabtaan waxyabaha keenay xaalandan aynu jirno. Darawaladan yaraaday waxay noqdeen caqabada ugu waaweyn taasi oo Dugsiyada Dadweynaha Portland kaliya ahi ayna haysan dhiftani, laakiin ay tahay mushkilad ka taagan dugsiyada dalka oo dhan. [Sahan qaran](#) oo laga sameeyey saddexda hay'adood ee gaadiidka ardaydu waxay daaha ka faydeen xog dhammeystiran oo ay ka mid yihiin in 51% jawaabihii la helay ay sharxayaan in darawaladani yaraaday ay tahay labo mid uun oo kala ah "mid aad u duran" ama " mid quus ah."

Dugsiyada Dadweynaha Portland, anaka iyo hay'adaha aan iskaashiga leenahay, First Student, maanta oo Khamiis ah, bisha Sebtamberna ay tahay 9 tiradii darawalada aan u baahneyn waxaa naga dhiman **86 darawal**. Maadaama aan qorshahayagu ku filan yahay jid kasta oo ardayda laga soo qaado ee degmada marka ay dhammaan darawalada aan hadda haysanaa ay yimaadaan shaqada, haddana waxaa soo kordhaya darawalada soo wacaya sheegayana inay xanuunsan yihiin ama aan iman karin shaqada, taasina waxay sababysaa darawal yaraan iyo in shaqadid loogu talogalay u socon weydo. Intaasi waxaa dheer maqnaashaha maalinlaha ah, dhowr amuurood oo kale oo iyaguna ka qeybqaatay darawal yaraanta aan waajahayno waxaa ka mid ah:

- Darawaladu shaqada kuma aysan soo noqon markii shaqada fasax sababeysan laga siiyey ee iskuuladu ay xirnaayeen waqtigii lagu jiray xanuunka faafaya.
- Darawalo fara badan oo(dhammaan shaqeeya waqtiga dhiman) kuwaasi oo ah hawlgabyo shaqooyinka ka fariistay waxay noqdeen kuwa u nugul inuu saameyn ku yeesho cudurka COVID-19

- Qaar kale oo darawalada ka mid ahi waxay noqdoon dadka ka maagaya inay qaataan tallaalka COVID-19, taasi oo dhammaan shaqaalaha gobolka iyo Dugsiyada Dadweynaha Portland looga baahan yahay inay qaataan tallaalka

Haddaba si gacan loo geysto darawal yaraantan dhacday, waxaan qaadnay anaka oo tixgalina siineyna daddaalo dhowr ah oo lagu horumarinayo kuwaasi oo ay ka mid yihiiin:

- In wax ka bedel lagu sameeyo waqtiyada ardayda la soo qaado iyo waqtiyada la celinayo jidakkii ay mari jireen ee degmada si ay basasku ugu suurtagasho inay maraan dhowr jid.
- In la diiwaangaliyo shaqaalaha xafiiska Waaxda Gaadiidkeena ee haysta shatiyada lagu kaxeeyo baska iskuulka si ay jidka u maraan, iyada oo ilaa 10 darawal la buuxiyo si ay jidka u maraan. Tani, si kastaba ha ahaatee, waxay abuuray shaqaale yaraan soo foodsaartay shaqaalihii xafiiska Gaadiidkeena, iyada oo aan aqoonsanahay inay dhib ku keentay dhinicii isgaarsiinta iyo/ama niyad-jab dadka isku dayaya inay soo wacaan xafiiska.
- Iyada oo kor loo qaadayo in la isticmaali baabuurga yaryar, oo ay ka mid yihiiin basaska yaryar(van) iyo addeegyada tagaasida la soo kireysto, iyo isticmaalida gaadiidka kuwooga kale.

Waxaan ku faraxsanahay inaan idinla wadaago waqtigan xaadirka ah inay tababar ku jiraan ilaa **50 darawal**. Si kastaba ha ahaatee, fadlan waxaad ogaataan in tababarkani uu qaadanayo muddo bil ah sidii ay u noqon lahaayen darawal si fiican u tababaran, iyada oo sidoo kalena hawshan ay ku timid waxoogaa dib u dhac ahi sababtoo ah qolyaha tababarka bixinaya ayaa iyaga naftoodu mararka qaarkood baska iskuulada waqtio ka mid ah wadayaal ka ah.

Waxaan aad ugu mahadcelineynaa shaqaalaheena Gaadiidka kuwaasi oo shaqeynaya maalintii oo dhan todobaadkii sidii ay hoos ugu dhigi lahaayeen saameyntan arrintani ku keentay waalidiinta PPS ee darawal yaraanta ka jirta wadanka oo dhan.

Waad ku mahadsan tiihin fahankiina iyo dulqaadka aad muujineysaa mar walba.

**Dan Jung**  
Sarkaalka Madaxa Hawlgalada

**Teri Brady**  
Agaasimaha Gaadiidka PPS